## Adeegyada laga cafiye ee TBI

Adeegyada waxaa lagu bixiyaa ayadoo la dhex marsiinaayo Medicaid iyo Adeegyada La cafiyey ee Guriga ee heer Bulsho (HCBS). Adeegyada la cafiyey waxay u oggolaadaan Medicaid inay bixiso adeegyada bulshadaada dhexdeeda, halkii ay ku bixin lahayd goob hay'ad ah, sida xarunta kalkaalinta. **Waa inaad buuxisaa dhammaan dhibcaha xaq u yeelashada si aad u hesho adeegyada la cafiyey ee TBI.**

Adeegyada La cafiyey ee TBI-da waxaa loogu talagalay dadka waaweyn ee da'doodu tahay 18 iyo wixii ka weyn ee soo gaaray dhaawac maskaxeed ee waxyeelada leh. Waxay bixisaa adeegyo bulshada dhexdeeda ee la xidhiidha baahiyahaaga.

Adeegyada soo socda ayaa laga yaabaa in la heli karo:

- Adeegyada Caafimaadka Maalinta ee Dadka Waaweyn
- Tignoolajiyada Taageerada
- Tababarka Daryeelaasha
- Caawinta Shaqada Guriga
- Isku Xirka Bulshada
- Weheliye / Qof Wada-jir
- Wax-ka-bedelka Guriga
- Cuntooyinka Guriga Lagu Keeno
- Gaadiidka Aan Caafimaadka Ahayn
- Daryeel Shakhsiyeed
- Nidaamka Jawaabta Degdegga ah ee Shakhsiyeed (PERS)
- Daryeel Ku-meel-gaar ah (nasasho u ah daryeelaha)
- Shaqo La Taageeray – Kormeer Joogto ah
- Shaqo La Taageeray – Qof-Qof ah
- Nolosha Deganaansho ee La Taageeray
- Wax-ka-bedelka Gaadiidka

Waxaad kala shaqayn doontaa Xiriiriyehaaga Adeegga si aad u aragto adeegyada aad u qalanto inaad hesho. *Adeegyada waxa la heli karaa oo kaliya ka dib marka la go'aamiyo in ay xaq u leeyihiin oo ay leeyihiin qorshe. Adeegyada dib looma dhigi karo.*

## Codso Maanta!

Waa in aad codsatid si loo go'aamiyo in aad xaq u leedahay. Marka codsigaaga la helo, waxaanu go'aamin doonaa haddii aad buuxisay qodobbada u-qalmitaanka.

### Ka dalbo onleynka ee iServe

### Adeegyada Medicaid iyo/ama kuwa La Cafiyey

https://iserve.nebraska.gov/

iServe Nebraska

**Warqad:** Si codsiga iimeyl ahaan laguugu soo diro, wac lambarka (877) 667-6266.

Buuxi, daabac, saxiix, oo iimeyl ahaan u dir boostada:
DDD Eligibility
PO Box 98947
Lincoln NE 68509-8947

Iskaan gaareey oo iimayl u dir:
dhhs.hcbswaiverapp@nebraska.gov

*Waxaad sidoo kale aadi kartaa xafiis kasta oo DHHS oo aad weydiisan kartaa gargaar.*

## La xidhiidh DHHS

Lambarka (877) 667-6266

Codsiga TBI iyo u-qalmitaanka:

dhhs.hcbswaiverapp@nebraska.gov

Nebraska State Office Building 301
Centennial Mall South
PO Box 98947
Lincoln, NE 68509-8947

# Adeegga La Cafiyey ee Dhaawaca Maskaxda ee Waxyeeleysan

## U qalmida

NEBRASKA
Good Life. Great Mission.
DEPT. OF HEALTH AND HUMAN SERVICES

*"Ka caawinta dadka inay ku noolaadaan nolol ka wanaagsan"*
**Meey 2025**

# Uqalmida Adeegga La Cafiyey ee TBI

Si aad u hesho adeegyada la cafiyey ee TBI, waa inaad buuxisaa dhammaan qodobbada u-qalmitaanka:

**1. U qalma, hesho, oo ilaali Nebraska Medicaid.**

- Noqo muwaadin Maraykan ah ama shisheeye u qalma oo hoos yimaada sharciga socdaalka iyo jinsiyadda ee federaalka oo si sharci ah ugu joog gudaha Maraykanka.
- Noqo qof degan Gobolka Nebraska.
- **Haddii aadan weli codsan Medicaid, waxaad u baahan tahay inaad sidaas samayso.** *Markaad dalbato iServe, waxaad codsan kartaa Medicaid isla wakhtiga adeegga la cafiyey.*

**2. Noqo 18 jir ama ka weyn.**

**3. Buuxi Shuruudaha Adeegga Kaalmada Dowladda ee dadka baahiyaha gaarka qaba.**

- *Eeg qaybta Go'aaminta Naafada.*

**4. Waa in la ogaado dhaawaca maskaxda ee waxyeelada leh (TBI).**

- DHHS waxay u baahan doontaa inay xogtan ka hesho dhakhtarka dhaawaca baaraya.
- *Eeg Qeexitaanka Qaybta Dhaawaca Maskaxda ee Waxyeelada leh.*

**5. Buuxi Heerka Daryeelka si aad ugu noolaato Xarunta Kalkaalisada (NF).**

- Buuxi Heerka Daryeelka Xarunta Kalkaalisada sida lagu qeexay 471 NAC 12.
    - DHHS waxay dhamaystiri doontaa qiimaynta si loo go'aamiyo tan. Waxaad heli doontaa wicitaan si aad u dejiso qiimeyntan
    - *U sawir code-ka QR dhanka midig si aad wax uga ogaato Heerka Miyir Qabka (LOC) buugyaraheenna qiimaynta.*
- Dooro inaad hesho adeegyada la cafiyey halkii aad ku noolaan lahayd goob hayadeed.
- Waxaad u baahan tahay taageerooyin iyo kaalmo gaar ah oo la filayo inay noqoto noloshaada oo dhan.

# Go'aaminta Baahida Gaarka

Dadka helaya adeegyada la cafiyey eeTBI waa inay codsadaan oo ay aqbalaan faa'iidooyin kasta oo federaal iyo gobol ah oo ay xaq ugu yeelan karaan, oo ay u isticmaalaan faa'iidooyinkaas ilaa inta ugu badan ee suurtogalka ah. Tani waxa ku jira faa'iidooyinka Kaalmada Bulshada ee Maamulka (SSA). Adeegga Kaalmada Bulshada ee Maamulka waxa laga yaabaa inay bixiso lacag-bixinno bille ah marka ay go'aamiyaan in qofku uu baahi gaar ah qabo. Tani waa go'aaminta baahida gaarka taas oo Nebraska Medicaid isticmaasho.

- Marka aad heysato go'aanka baahiyaha gaarka ee Adeegga Kaalmada Bulshada, DHHS way aqbashay go'aankaas.
- Marka uu adeegga Kaalmada Bulshada uusan go'aamin inaad baahi gaar ah qabto, DHHS waxay leedahay Kooxda Dib u Eegista Gobolka (SRT) oo isticmaali doona isla shuruudaha Adeegga Kaalmada Bulshada ee Maamulka si ay u gaaraan go'aan ka gaarista naafanimada.

## Qeexida Dhaawaca Maskaxda ee Waxyeelada leh (TBI)

Waa in aad martaa baaritaanka dhaawac maskaxeed oo waxyeelada leh (TBI) si aad ugu jirto adeegga la cafiyey ee TBI.

Dhaawaca maskaxda ee waxyeelada leh (TBI):

- waa dhaawac maskaxda ah oo aan sii xumaaneyn, oo aan dhalasho ahayn, ka dhasha xoog jireed oo dibadda ah.
- Waxay u horseedi kartaa daciifnimo joogto ah ama ku meel gaar ah ee hawlaha garashada, jireed, iyo cilmi nafsiga; iyo
- Waxay leedahay xaalad miyir-qab oo yaraatay ama isbeddashay waqtiga ogaanshaha.

*Markaad warqad ka haysato dhakhtarkaaga ogaanshaha, waxaad ku soo gudbin kartaa codsigaaga, haddii kale waanu codsan karnaa.*

Adeegga La Cafiyey ee TBI ma aha dhaawaca maskaxda oo la helay uuna sababay istaroogga, burooyinka, ama sababo kale oo aan dhaawac ahayn. Erayga TBI ma khuseeyo dhaawacyada maskaxda ee ay keento dhaawaca ka dhasha dhalmada.

**Daawo Fiidiyowga U-qalmitaanka TBI**

**Fiidiyowgu waxaa la filayaa 2026.**

## Xiriirinta Adeegga

Xiriiriyaha Adeegga (SC) waxaa loo bixiyaa si uu kaaga caawiyo isku-dubbaridka iyo kormeerida adeegyadaada, oo ay ku jiraan qorista qorshahaaga shakhsi ahaaneed.

Markaad haysato Adeegga La Cafiyey ee TBI, waxaad dooranaysaa cidda ku siinaysa Xiriiriyahaaga Adeegga:

- Area Agencies on Aging (AAA) ama
- League of Human Dignity (LHD).

*Waxaa lagu siin doonaa macluumaadka xiriirka ee xafiiska SC ee aad doortay ka dib marka la go'aamiyo Xarunta Kalkaalintaada Heerka Daryeelka.*

**Wax ku saabsan LOC ka baro Buugyaraha Qiimaynta**